



Shaqaalaha arrimaha bulshada ee dugsiga ayaa ardayda ka caawiya inay ka gudbaan caqabadaha waxbarasho, bulsho iyo shucuureed

Kate Allen oo ka tirsan Dugsiga Sare ee Cleveland waxay ugasoo shaqeysay sida shaqaale bulsho dugsiga Oregon ku dhawaad 20 sano waxayna hadda sidoo kale uga shaqeysaa shaqaale bulsho oo ku saabsan Meelaynta Gaarka ee PPS. Waxaan weydiinay inay la wadaagto fikradeeda ku saabsan doorka shaqaalaha bulshada ee dugsiga ay ka ciyaaraan bulshada dugsiga.

Toddobaadka Maarso 1-7 wuxuu astaan u yahay dabaaldega Toddobaadka Shaqada Bulshada ee Dugsiga. Mawduuca "Beacon of Hope", shaqaalaha bulshada ee dugsiga guud ahaan dalka ayaa la wadaagi doona kaalintooda muhiimka ah ee ka caawinta ardayda inay daboolaan caqabadaha tacliinta, bulshada, iyo shucuurta ee wadada si ay u noqdaan kuwa caafimaad qaba, da' yar naxariis badan. Meel marinta Sharciga Guusha Ardayga awgiis, waxaa dhowaan jiri doona shaqaale bulsheed dheeri ah oo ka hawl gala dugsiyada hoose, dhexe, K-8 iyo dugsiyada sare ee PPS.

In kasta oo doorarka shaqaalaha bulshada ee dugsiga ay u ekaan karaan mid ka duwan dugsi ilaa dugsi, hal shay oo habka aan wadaagno ayaa ah u dooditaan. Shaqada shaqaalaha bulshada ee dugsiga marwalba waxaa kamid ah u doodida baahiyaha ardayda. Waxaan ka shaqeynaa sidii aan u fahmi laheyn caqabadaha ardaydeenna iyo qoysaskooda ay wajahayaan waxaanna jirtaa meel gaar ah oo aan ugu doodno heerarka maxalli, dawlad, gobol iyo heer qaran ee dhiirrigelinaya isbedelka bulsheed, sinnaanta midabka iyo hubinta ilaha ku habboon dhammaan ardayda iyo qoysaska.

Shaqaalaha arrimaha bulshada ee dugsiga ayaa bixiya adeegyo taageero ardayda iyo qoysaska dhibaataysan. Waxaan nahay xirfadlayaal caafimaadka dhimirka oo tababaran kana jawaabi kara dhibaatooyinka sida dhimashada qoyska, guri la'aan, ama xaaladaha degdega ah ee caafimaadka dhimirka. Waxaan sidoo kale wadnaa kooxaha taageerada si aan uga caawino carruurta la macaamilida walbahaarka iyo murugada, barno casharrada fasalka ee ku saabsan ka-hortagga is-dilka, iyo bixinta talo-bixin muddada gaaban ah. Ugu dambeyntiina, waxaan bixinnaa isku xirka muhiimka ah ee ilaha bulshada sida cuntada, dharka iyo guryaha. Waan dadaalnaa si aan u adeegsano hab ah jawaab siin dhaqameed, taasoo dhaawaca usoo wargalinaya sida ugu wanaagsan ee loogu adeegayo ardayda oo dhan.

Qoysasku badanaa waxay la xiriiraan shaqaalaha bulshada ee dugsigaa markay ka walaacsan yihiin ardaygoodu la dhibtoonayo caafimaadka dhimirka, isticmaalka maandooriyaha ama baahiyada kheyraadka degdega ah. Waxaan la shaqeynaa ardayda iyo waalidiinta, la taliyayaasha dugsiga, maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsiga si aan u dhisno qorshayaasha taageerada ku saleysan ardayda.

Ahaanshaha shaqaale bulsho dugsi micnaheedu waa waxyaabo kala duwan oo ku xiran maalinta. Markay baahida caafimaad dhimirka iyo isticmaalka maandoorayahayagu ay bilaabato, waxaan halkaa u joognaa inaan ka caawinno caruurta inay sii ahaadaan kuwa nabad qabo, dhisaan bad qabkooda oo aan ku xiriirino kheyraadka ka caawin doona inay koraan oo naftooda uga fiican noqdaan.